

Orientation to Ontario

LACAGTA IYO DHAQAALAHA GAARKA AH

BANGIDA IYO MIDOWGA DAYNTA

Bangida iyo midowga daynta ayaa bixiya adeegyada dhaqaalaha oo badan ayna ku jiraan:

- Koontooyinka jeega iyo kaydka.
- Kaarka bangiga oo aad ku isticmaalayso bangigaaga marka aad joogto mashiinka lacagta lagala baxo (ABM ama ATM) aadna wax uga iibsano karto goobaha ganacsiga.
- Adeegga bangiga ee internetka iyo taleefaka ee 24 saac shaqeyna.
- Kaararka daynta, laymanka daynta, amaahda, daynta guryaha.
- Agabka maalgashiga iyo qorshaynta dhaqaalaha.

Bangi iyo midowga daynta oo badan ayaa qarash bile ah ku qaata adeegyadooda, hase yeeshee waxaa jira bangida qaar oo baxsha adeegyada bangiga oo bilaash ah. Waydii qarashaadka bangiga kahor intaadan furan koonto. Waa inaad keentaa labo cadaymaha aqoonsiga ah: mid uu ku yaalo sawirkaaga iyo saxiixaaga iyo mid muujinaaya ciwaanka gurigaaga.

DAYN

Kaararka daynta iyo amaahda ayaa badanaa ah noocyada ugu badan ee daynta. Marka aad isticmaasho dayn, dayn bixiyaha ayaa ku saari doona lacag dulsaar ah (kaasoo badanaa ah bangi ama shirkada kaarka daynta). Qiimaha dulsartu waa cadadka boqolkiiba ee wadarta guud ee aad daysatay.

Hadba inta ay dheeraato dib u celinta daynta, ayay sii badanaysaa lacagta dulsarta ah

ee aad bixinayso. Akhri tasmada Kusoo Dhawoow Canada si aad u hesho xog badan oo la xariirta noocyada kaladuwan ee daynta iyo amaahda: canada.ca ama findlink.at/welcomecan

Taariikhdaada daynta ayaa ah diiwaanka amaahaha, daynta iyo lacag bixinta aad horey u sam ysay. Dad intooda badan ayaa bilaaba inay ku dhisaan taariikhdaada daynta kaarka amaahda. Isticmaalka masuuliyada leh ee daynta ayaa tusaysa dayn bixiyaasha inaad tahay qof u qalma in dayn la siiyo. Waydii qof jooga bangigaaga barnaamijyada kaarka daynta ee dadka wadanka ku cusub.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo Wakaalada Dhaqaalaha Macaamiisha ee Canada oo aad ka helayso Canada ama fcac-acfc.gc.ca

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan khiyaannada iyo tuugada aqoonsiga, akhri Buug Gacmeedka Macaamiisha Oonleena ee Ganacsiyada Canada: consumerhandbook.ca ama findlink.at/CCHanbook

CANSHUURAHA

Dawladda Canada ayaa u adeegsada canshuuraha si ay u bixiyaan qarashaadka adeegyada dadwaynaha iyo kaabayaasha sida daryeelka caafimaadka, dugsiyada iyo wadooyinka. Qeexitaanka noocyada kaladuwan ee canshuuraha, booqo Wasaarada Dhaqaalaha oo aad ka helayso ontario.ca ama findlink.at/Finance

Canshuurta Dakhliga - Haddii aad dagan tahay Canada, waa inaad buuxisaa canshuur celinta dakhliga sanad kasta aadna u dirtaa Wakaalada Dakhliga Gudaha ee Canada (CRA).

Funded by / Financé par :



Inta badan dadka shaqaalaha ah ayaa mushaarkooda laga jaraa canshuuraha— shaqaalaha qandaraaska iyo dadka iskood u shaq ysta waa inay canshuurta ayagu baxshaan.

Dad badan ayay lacagta u celisaa CRA kadiib marka ay gudbiyaan canshuur celintooda waxayna qaataan lacagta canshuurtu soo celiso iyo qarashaadka. Canshuur celinnada federaalka waxaa sidoo kale ku jira qayb lagu buuxsho canshuurta dakhliga ee gobalka. Waxaad heli kartaa caawimaad bilaash ah oo la xariirta buuxinta celintaada oo aad ka helayso Barnaamijka Canshuurta Dakhliga ee Mutadawiciinta Bulshada.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo webseedka Wakaalada Dakhliga Gudaha ee Canada (CRA) canada.ca ama findlink.at/incometax

Canshuurta libka — Dhammaan macaaniisha Ontario ayaa bixiya Canshuurta Dulsaaran libka (HST) oo laga qaado badeecooyinka iyo adeegyada ay iibsadaan macaamiishu. Alaabaha muhiimka ah sida adeegyada cuntada, xafaayadaha iyo dharka carruurta ayaan laga qaadin canshuur. Canshuurta HST ee Ontario waa 13% qiimaha iibka. Dadka dagan Ontario ee hela dakhliga hoose ama dhexdhexaadka ah ayaa u soo celisaa CRA qayb yar oo kamid ah lacagta canshuurta HST. Waxaad ku codsan kartaa lacagta aad ku helayso HST marka aad dirayso canshuur celintaada sanadkii. Cadadka lacagta lagu siinaayo ayaa ku xiran heerkaaga dakhliga.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan kaalmada canshuurta HST, booqo canada.ca ama findlink.at/GST-HST


Canshuurta Guryaha – Mulkiileyaasha Guryuhu waa inay dhiibaan canshuurta magaaladooda. Dawlada magaalada ayaa go'aaminaysa heerka canshuurtaan iyo cadadka la qaadaayo ayadoo lagu salaynaayo qiimaha guriga. Haddii aad kireysatay gurigaaga ama ganacsiga, lagaama qaadaayo canshuurta guryaha, laakiin qiimaha canshuurta guryaha ayaa qayb ka ah qiimeyaasha lagu jaangooyo kirada.

LACAGAHA CANSHUURTA LAGU HELO IYO GUNNOOYINKA

Waxaa jira taageerooyinka badan ee dakhliga oo ay heli karaan dadka reer Ontario ayadoo ku xiran canshuur celintooda dakhliga, sida lacagta ay ku helaan caymiska HST. Waa muhiim inaad gudbiso canshuur celin xataa haddii aadan haysan wax dakhli ah.

Labo kaalmada canshuurta ah oo ay ku jiraan Gunnada Canshuurta Dakhliga dadka Shaqeyaya (WITB) iyo Gunnada Caawimaada Carruurta ee Canada (CCB). WITB iyo CCB waxaa lagu saleeyaa dakhligaaga. Ogoow inay sidoo kale qasab tahay in xaaskaaga ama lamaanahaagu ay qasab tahay inay gudbiyaan canshuur celin sanad kasta si ay ugu qalmaan kaalmada canshuurta iyo gunnooyinka kale.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan kaalmooyinka iyo gunnooyinka canshuurta, booqo Wakaalada Dakhliga Gudaha ee Canada oo aad ka helayso canada.ca ama findlink.at/cra-bnft



OGEYSIIS MUHIIM AH

Difaac aqoonsigaaga adoo adeegsanaaya ruqsada darawalka ee Ontario ama kaarka aqoonsiga sawirka leh ee Ontario.

Ha Adeegsan Lambarkaaga Caymiska Bulshada.

